



Xaashida Xaqiiqda ee Molnupiravir: Daawo loogu talagalay daawaynta COVID-19

(Ee Bukaanka, Waalidiinta & Daryeel bixiyayaasha)

S: Waa maxay Paxlovid?

Paxlovid waa daawo loogu talagalay daawaynta cudurka COVID-19-ka fudud ilaa dhexdhexaadka ah. Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Mareykanka (FDA) ayaa markii ugu horreysay oggolaatay isticmaalkeeda ee Diseembar 2021.

S: Yaa qaadan kara Paxlovid?

Paxlovid waxaa loogu talagalay dadka leh calaamadaha fudud ilaa dhexdhexaadka ah ee COVID-19 kuwaas:

- Oo ah dad waaweyn, ama carruur da'doodu tahay 12 jir ama ka weyn oo miisaankoodu yahay ugu yaraan 88 rodol. (40 kg),
- Oo laga helay cudurka COVID-19, iyo
- Oo halis sare ugu jiraan jirro daran oo COVID-19 ah.

S: Sidee loo qaataa?

Paxlovid waxaa laga qaataa afka. Qiyaasta caadiga ah waa saddex kiniin laba jeer maalintii shan maalmood. Waa muhiim in la dhammeeyo koorsada daawaynta ee 5-ta maalmood ah oo dhan oo aad sii waddo go'doominta marka loo eego talooyinka caafimaadka dadweynaha. Paxlovid waa in aan la qaadanin wax ka badan 5 maalmood.

S: Yey tahay in UUSAN qaadan Paxlovid?

Paxlovid **LAGUMA** talinayo bukaanada qaba:

- Cudurka daran ee beerka
- Kelyo xanuun daran
- Xasaasiyad adag oo wax walboo ku jira dawadan

Bukaanka qaba xaaladaha kore, ama infekshinka HIV oo si liidata loo ilaaliyay, waa in ay kala hadlaan daryeel bixiyehooda caafimaadka ka hor intaysan qaadan Paxlovid.

S: Maxay yihiin waxyeelada soo raaca ee Paxlovid?

Waxyeellooyinka daawadan waxaa ka mid ah:

- Dareenka dhadhanka oo beddelmay ama daciifay
- Shuban
- Cadaadiska dhiigga oo kordha
- Muruq xanuun

Paxlovid sidoo kale waxay la falgeli kartaa daawooyinka kale. Tani waxay mararka qaarkood keeni kartaa falcelin nafta halis gelisa. Fadlan la socodsii daryeel bixiyahaaga caafimaadka **DHAMAAN** daawooyinka aad isticmaasho ka hor inta aanad qaadan Paxlovid. Fadlan ku dar daawo kasta oo aan farmashiyaha laga qorin iyo kaabista dhirta.

S: Maxaan LOO isticmaalin Paxlovid?

Paxlovid **LOOMA** isticmaalo:

- Daawaynta ugu horreysa ee dadka u baahan isbitaalka sababo la xiriira jirro daran ama halis ah oo COVID-19 ah
- Kahortagga caabuqa COVID-19.

S: Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan la xiriir bixiyaha daryeel bixiyahaaga caafimaadka, booqo websaydhka Paxlovid oo ah www.COVID19oralRx.com ama wac 1-877-219-7225.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.